



Nidaamyada cusub!

Warbixin muhim ah: Laga bilaabo 1 jannayo 2018, waxaa hirgeli doono nidaamyo cusub, kaasoo khuseeya qofka adigoo kale ah oo ilmahooda lagu xannaanadeeyo dugsiga xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska. Qodobada nidaamyada cusub waxaa iyagoo aan qabyo ahayn la soo bandhigo doonaa www.vaxjo.se/nyttregelverk dhamaadka diseembar.

Några av de större förändringarna handlar bland annat om:

- **Safka oo lex bilood laga dhigi doono** – Mudada safka boosaska dugsiga xannaanadda oo berri hore ahaan jiray afar bilood, waxay noqon doontaa lex bilood. Taasoo macneheeda ah in tusaale, haddii aad doonayso in boos bisha agoosto lagu siiyo, aad bisha febraayo safka isku qori karto.
- **Dugsiga xannaanadda guud** – Haddii aad ku talo jirto inaad dugsiga xannaanadda guud, iska beddesho ama ku beddelato waa inaad 1 bil kahor na wargelisa. Fiirogaar sii in wakhtiyada dugsiga xannaanadda guud ay yihiin kuwa joogto ah, waxaana go'aan ka gaaro agaasimaha dugsiga xannaanadda. Haddii aad hab firfircon shaqo-doone u tahay, waxaa lagula talinayaa in aadan dooran dugsiga xannaanadda guud. Maxaayeelay, waxaa dhici karto in dhaqsi aad shaqo ku hesho, taasoo aan ku suuragelin doonin in durbadiiba aad korarsato saacadaha xannaanadda.
- **Shaqada qaab firfircon loo raadsado** – Nidaamka cusub wuxuu qofka adigoo kale oo shaqo qaab firfircoo u raadsada, xaq u siinayaa in ilamahiisa ugu tago dugsiga xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska hadba baahidiisa. Qofka xaq u leh in ilmahiisa uu dugsiga xannaanadda ugu tago hadba baahidiisa, xaq kuma laha ku meelaynta saacadaha buuxa. Laakinse, wuxuu xaq ku leeyahay in ilmahiisa ugu tago dugsiga xannaanadda, markii tusaale loogu yeero waraysiga shaqo ku qorida, goob tababar shaqo, tababar ama kulamada Xafiiska Shaqada. Kahor iyo daahid la'aan waa in maamulka dugsiga xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska la wargeliya. Qofka lagu tiriyu in u qaab firfircoon shaqo u raadsado, waa qofka lagu xisaabiyo in u ka qaybgalo qorshaha suuqa shaqada/qaab firfircoon shaqo u raadsado isagoo adeegsanaayo Xafiiska Shaqada. Haddii qaab firfircoon aadan shaqo u raadsan, waxaad ilmahaaga dugsiga xannaanadda ugu tegi karta ugu badnaan 15 saacado/toddobaadkii, laakin xaq kuma lihid in goobaha wakhtilummiska lagugu xannaanadeeyo.
- **Jirro isku qorid** – Haddii aad jirro isku qorto, waxaad xaq ku leedahay in ilmahaaga lagu xannaanadeeyo dugsiga xannaanadda/goobaha wakhtilummiska hab waafaqsan jadwalka caadiga ah. Isla nidaamkaas ayaa hirgalaayo haddii ilmo kale oo xannuunsan aad guriga ku daryeelayso. Waa haddii ilmahaaga tan iyo berri hore ku meelaysan yahay dugsiga xannaanadda/goobaha wakhtilummiska.